




**VALG**

**WARBIXIN**

Soomaali | Somali

# Doorashada Stortinget ee 2017

Warbixin muhiim u ah qofka wax dooranaya



**Maalinta doorashadu waa 11. sibteembar. Xusuuso warqad aqoonsi!**

**VALG** direktoratet

## Doorashada Stortinget ee 2017-ka

Stortinget waa golaha shacabka ee la doorto ee Norway. 169 xubnood ayaa la doortaa afartii sanaba mar. Kuwan ayaa matalaya dadweynaha 19-ka gobol oo idil. Hawlaha ugu muhiimsan ee Stortinget waa go'aaminta sharciyada, go'aaminta miisaaniyadda dalka, iyo koontaroolka dawladda.

Ka qaybqaado go'aaminta cidda Stortinget kugu matalaysa afarta sano ee soo socota. **Codkaaga isticmaal!**

Buugyarahaan waxaad ka helaysaa warbixinta sidii aad codkaaga u dhiiban lahayd.

## Maalinta doorashadu waa isniinta 11-ka sibteembar 2017-ka

Degmooyin badan ayay doorashadu ka socotaa xataa axadda 10-da sibteembar. Degmada ayaa dadka u sheegeysa in ay doorashadu hal maalin soconeyso iyo in ay labo maalmood soconayso.

### **Xusuuso warqad aqoonsi marka aad codkaaga dhiibanayso!**

Sharciga doorashada ayaa wuxuu dhigayaa in qofka wax dooranaya ee aanu garanayn qofka codka loo dhiibayo in looga baahan yahay in uu aqoonsi dhiibto. Waxaa tusaale ahaan **aqoonsi** noqon kara baasabboor, laysin ama kaar bangi oo sawir leh, laakiin aqoonsi kalena waad isticmaali kartaa. Aqoonsiga waa in ay ku gornaadaan magaca doortaha, taariikhda dhalashada iyo sawir.

Haddii aad ku jirto guryaha dadka waaweyn, isbataal ama xabsi, waxaa aqoonsigaaga caddayn kara qof ka shaqeeya meesha aad ku nooshahay.

### **Dhammaan dadka wax dooranaya waxaa loo dirayaa kaar doorasho (valkort)**

Kaarka doorashada waxaa ku qoran goorta iyo goobta aad doorashada ka dhiiban karto maalinta doorashada. Kaar doorasho uma baahnid si aad codkaaga u dhiibato, laakiin wakhti ayuu kuu baajinayaa. Kaarka doorashadu aqoonsi ma aha.

## Yaa cod dhiiban kara?

Doorashada Stortinget waxaa xaqa cod-dhiibashada leh dadka haysta dhalashada norwiiijiga ee ka weyn 18 sano oo keliya. Codbixiyaha waxaa ku filan in uu 18 sano buuxiyo sanadka doorashada dhexdiisa. Doortuhu waa in uu ku jiraa diiwaanka dadka Norway deggan ama uu ku jiri jirey diiwaankaas.

## Goorma xaggeedse codka ka dhiibanaysaa?


**Maalinta doorashada** waa in aad codkaaga ka dhiibataa degmada aad ka diiwaangashan tahay in aad deggan tahay 30-ka juun 2017-ka. Goobaha doorashada ee degmada tii aad doonta ayaad codkaaga ka dhiiban kartaa. Eeg sawirrada bogga midkaan xiga ee muujinaya sida aad codkaaga u dhiibanaysa maalinta doorashada.

**In aad codkaaga horey u sii dhiibato** waxaad samayn kartaa laga billaabo 1-da luuliyo ilaa iyo 8-da sibteembar adiga oo codkaaga horey uga sii dhiiban kara degmo kasta oo aad doonto.


Haddii aad ka codeyneyso degmo ka baxsan gobolka aad deggan tahay, waxaa lagu siinayaa warqad cod-bixin (stemmeseddel) oo ay ku qoran yihiin magaca xisbiyada siyaasadda ee diiwaangashan, laakiin aanu ku qornayn magac musharrax. Markaas waa in aad istillaab saartaa ama ku qortaa xisbiga/kooxda aad codkaaga siineyso. Adiga laftigaaga ayaa intaad soo qaadatid warqadda cod-bixinta ee gobolkaaga ayaad dabadeed taas isticmaali kartaa haddii aad dooneysid in aad wax kala beddesho.

Haddii aad jirran tahay ama aad naafo (ufør) tahay, waxaad degmada ka codsan kartaa in aad horey codkaaga guriga ugu sii dhiibato. Degmada ayaa kuu sheegeysa goorta iyo meesha aad codkaaga ku dhiiban karto.


## Sidee ayaad codkaaga u dhiibanaysaa maalinta doorashada?




1) Qaado warqadda cod-bixinta ee aad dooneysa in aad isticmaasho.



2) Warqadda cod-bixinta ku samee wixii beddelaad ah ee aad dooneysa in aad samayso (eeg sharraxaadda ku qoran bogga midkan xiga).



3) Isku laab warqadda cod-bixinta iyada oo uu magaca xisbigu gudaha jiro meesha tiimbaraha lagu dhufanayana ay dibedda soo jirto – markaa lama arki karo cidda aad codkaaga siisay. Bokhshad iyo wax kale midna la dhex gelin maayo warqadda cod-bixinta.



4) U tag hawlwadeenka doorashada si uu tiimbare ugu dhufto dusha warqadda cod-bixinta. Warqadda cod-bixintu waa in ay tiimbaraysnaataa si loo aqbalalo!



5) Warqadda cod-bixinta ee la tiimbareeyay ku rid santuuqa codka.


## Sidee ayaad wax uga beddelaysaa warqadda cod-bixinta?

Adiga ayaa xor u ah beddelidda warqadda cod-bixinta. Haddii aadan beddelin, waxaad musharraxiinta ugu codayneysaa sida ay ugu kala horreeyaan warqadda cod-bixinta.

Haddaba si ay beddelaadda aad warqadda cod-bixinta ku samayso micno ugu samayso natiijada doorashada, waa in ay magaca musharraxa beddelaan in ka badan kala bar ah cod-bixiyayaasha gobolka ee codkooda siiyay xisbiga/kooxda.


Sharraxaadda sida aad beddelaadda u samayneyso, waxay ku qoran tahay warqadda cod-bixinta.

### Sidaan ayaad u beddeli kartaa warqadda cod-bixinta:



#### Beddelaadda sida ay musharraxiintu u kala horreeyaan

Lambar (cusub) ku qor barta afargeeyska ah (ruten) ee **bidixda** ka jirta magaca musharraxa (musharraxiinta) adiga oo taas ku muujinaya sida aad dooneyso in ay musharraxiintu u kala horreeyaan.



#### Tirtiridda musharraxiinta

Calaamad saar (istillaab, jiitin ama wax la mid ah) barta afargeeyska ah ee **midigta** ka jirta magaca musharraxa (musharraxiinta) aad dooneyso in aad tirtirto.

## Yaa la dooranayaa?

Gobol walba waxaa la siiyay tiro go'an oo ah dadka gobolkaas Stortinget u fadhiisanaya. Marka ay natiijada doorashadu soo baxdo ayaa kuraasta waxaa loo qaybinayaa xisbiyada/kooxaha gobolka. Kaddib ayaa la ogaanayaa musharraxiinta kuraastaas buuxineysa. Marka uu gobolku intaas sameeyo, ayaa natiijada doorashada ee gobolka waxaa loo dirayaa guddiga doorashada qaranka (riksvalgstyret), kaas oo xisaabi doona musharraxiinta helaya kuraasta isu-dheellitirka (utjevningmandatane). Gobol walba waxaa laga soo dooranayaa hal kursi oo isu-dheellitir ah. Waxaa gebi-ahaanba Stortinget loo dooranayaa 169 xubnood.

Warbixin intan ka badan waxaad ka heleysaa [www.valg.no](http://www.valg.no)



Waxaa 2017 soo saaray Agaasinka doorashooyinka ee Norway  
Daabacaaddan waxaa sidoo kale lagu diyaariyay nynorsk, af-saamiga iyo toban luuqadood oo qalaad

Warbixin intan ka badan oo doorashada ku saabsan ka eeg [www.valg.no](http://www.valg.no)